MASHRUUC DOWLADEED OO MUHIM AH

MADAXBANNAANIDA KALA DOORASHADA 2017–2018

Madaxbannaanida kala doorashada ee Jyväskylä, Hankasalmi iyo Uurainen

Xarunta caafimaadka ee aagga hawlo-wadareedka Jyväskylä (Jyte) waxay ka qaybqaadanaysaa tijaabada madaxbannaanida kala doorashada, taas oo la xiriirta dib u cusboonaysiinta adeegyada caafimaadka iyo arrimaha bulshada (sote). Tijaabadani waxay soconaysaa ilaa dhammaadka sannadka 2018-ka.

Yay khusaysaa tijaabada madaxbannaanida kala doorashada?

Tijaabadani waxay khusaysaa dadka ku dhaqan aagagga rugaha caafimaadka ee Huhtasuo, Keskusta, Kuokkala, Vajaakoski, Palokka, Hankasalmi iyo Uurainen.

Tijaabadan qayb kama aha dadka sida joogtada ah ugu xiriira adeegyada guri ku xannaanaynta iyo sidoo kale macaamiisha degaanka adeegga leh ama guryaha loogu talaggalay dadka waayeelka ah iyo naafada oo leh adeeg joogto ah.

Maxaa loola jeedaa tijaabada madaxbannaanida kala doorashada?

Muddada tijaabadu socoto waxaad daryeelkaaga caafimaad kala xiriiri kartaa adeegyada guud ee degmada ama kuwa gaarka ah ee hawlaha caafimaadka qaabbilsan. Taas macnaheedu wuxuu yahay, inaad dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad ugu tagi kartid rugta caafimaadka degmadaada ama rug caafimaad oo gaar loo leeyahay.

Kharashka macmiilku waa isku mid labada meeloodba.

Kharashka waxaa laga soo dallacayaa magaalada Jyväskylä.

Fiiro gaar ah u yeelo:

In rugaha caafimaadka iyo dhakhtar kasta aadan gaar u dooran karin oo qaybta aad dooratid, lix bilood baad xiriir la lahaanaysaa. Markaas ka dib ayaad haddana doorasho cusub samayn kartaa, haddii ay kula noqoto.

Adeegyadee baan dooran karaa?

Adeegyada tijaabadan qaybta ka ah waa

- dhakhtarka guud iyo kalkaalisada caafimaadka
- baaritaannada shaybaarka daryeelka la xiriira
- sawirka raajada ee daryeelka la xiriira.



Haddii aad u baahatid, waxaad helaysaa talabbixin iyo hagid ku aaddan arrimaha bulshada. Dhinaca hagidda bulshada waxaa laga heli karaa talooyin ku saabsan dhibaatooyinka la xiriira dhaqaalaha nololmaalmeedka, degaanka ama guriga iyo shaqooyinkaba. Gacanyaraha arrimaha bulshadu go'aan ma gaaro, balse halka kugu habboon buu kugu hagayaa ama kuu tilmaamayaa.

Tijaabada madaxbannaanida kala doorashada waxaan tusaale ahaan qayb ka ahayn la kulanka dhakhaatiirta khaaska ah iyo teraabiyada jirka. Adeegyadaas waxaad ka helaysaa rugta caafimaad ee degmadaada, ama lacagtaada ayaad adeegyada khaaska loo leeyahay uga iibsan kartaa.

Sidee baan wax u kala dooran karaa?
Adeegyadaada caafimaad waxaad ka dooran kartaa cinwaankan:
www.palse.fi/jyvaskylä

Nambarrada bangigaaga internetka ama nidaamka xaqiijinta moobayl ahaanta ah ayaad bogga adeegga ku galaysaa. Boggaas internetka ayaa tallaabo-tallaabo laagaga hagayaa, islamarkaasna aad kala socon kartaa heerarka ay aqoonsashadaadu marayso.

Bogga kala doorashada waxaad ka helaysaa macluumaad ku aaddan bixiyayaasha adeegyada ama xarumaha caafimaadka iyo rugaha dhakhaatiirta ee aad wax ka dooran kartid. Doorashada aad samaysay waxay dhaqangalaysaa 7 maalmood ka dib oo ka bilaabanaysa maalintii aad wax dooratay.

Sidoo kale doorashadaada telefoon baad ku samayn kartaa ama rugta caafimaad ee aad hadda ka tirsantahay amaba goobta uu adeeg bixiyaha cusubi ka hawlgalo ayaad tagi kartaa. Doorashadaas iyaduna 7 maalmood ka dib bay dhaqangalaysaa.

Doorashadu 6 bilood bay markiiba soconaysaa ama jiraysaa. Markaas ka dib waad sii wadan kartaa xiriirka aad la leedahay isla adeeg bixiyaha aad horay dooratay, adigoo aan wargelin cusub samaynin.

Doorasho cusub waxaad samaynaysaa, haddii aad rabtid, inaad adeeg bixiyaha iska beddeshid amaba aad doonaysid inaad ka soo laabatid adeegyada gaarka ah oo rugta caafimaadka degmada aad u soo noqonaysid.

Doorashadu ma khasab baa?
Inaad wax kala doorato khasab kuguma aha. Markaas adeeggaaga caafimaad isla sidaadii hore ayaad u helaysaa oo waxaad ka tirsanaanaysaa rugta caafimaad ee degmadaada wakhtigan la joogo.

Faahfaahin dheeraad ah oo tijaabadan ku saabsan:
Tijaabada madaxbannaanida kala doorashada waxaad faahfaahinteeda kala xiriiri kartaa telefoonkan: 014 266 0133, isniin - khamiis saacadaha 8 – 16 iyo jimce saacadaha 9 – 16.

Bogga internetka ee magaalada Jyväskylä waxaad ka helaysaa warbixin aad u faahfaahsan iyo fiidiyow ku tilmaamaya oo tijaabadan ku saabsan, cinwaanka aad ka helaysidna waa:
www.jyvaskyla.fi/terveys/valinnanvapaus/valinta